WORLD BANK GROUP

Qoraalada Kulan-hawleedka

Noocyada Sanduuqyada Kaydka Iyo Xasilinta Maaliyadda

Diyaarintii: Kevin Carey

"Aqoon kobcin ku saabsan Maamulka Khayraadka Shidaaalka"

Badanka waddamada kheyraadka hodanka ku ahi (RRCs), waxa ay abuuraan dakhli wax-soo-saar oo ka jawaaba, baahiyaha iyo dhibaatooyinka ku keento hantida khayraadka laga helaa siyaasadda miisaaniyadeed iyo maamulka hantida ma guurtada ah ee waddanka

Sanduuqyada khayraadku waa tiro sanduuqyo ah oo qayb ka ah sanduuqyada maalgashiga ee dawladdu maamusho oo loo yaqaaan Sanduuqa Hantida Madaxa Bannaan(SHM). Sanduuqan waxa uu ka koobanyahay sanduuqyo kala geddisan oo leh ujeedooyin kala duwan, habab hanti ururin iyo hanti kasaarid iyo qaabdhismeeyo haya'adaha kala duwan.

Sanduuqyada Khayraadka waxa badanaa si guud loogu kala saaraa saddex qeybood iyada oo loo eegaayo nuxurka ulajeedooyinkooda. Kuwa ugu muhiimsan sanduuqyadan , ee wadadama khayraadka hodanka ku ah waa; Sanduuqa Xasilanta, sanduuqa kaydinta, iyo kan maalgalinta. Sanduuqa xasilinta iyo ka kaydintuba waxay leeyhiin shuruudo iyo nidaam adag (Kaas oo noqon kara mid doorsoomi kara ama mid aan doorsoomi karin) oo la xidhiidha ku darka iyo saaridda hantida. Sanduuqa maalgalintu waxa uu leeyahay shuruudo ka fudud labada kale.Waxa jira tiro sanduuqyo ah oo si miisaaniyadda ka madax bannaan loo adeegsan karo.

Sanduuqa Xasilanta ujeedadiisu waxaa ay tahay in la yareeyo saamaynta dakhliga is-badbadalaya ee khayraadku ku leedahay miisaniyadda iyo dhaqaalaha iyo in la xoojiyo nimaad maaliyadeedka. . intabadan sanduuqyadani waxay leeyihiin dhakhli go'an iyo sharciyo hawlgal oo la xidhiidha dhigaalka loogu talo galo hawlo iman kara iyo kala bixidda. -. La bixidda iyo dhigashadu waxa ay ku xidhan tahay gaadhista ujeeddo la filayo (Sixirka kheyraadka ama dakhliga)- iyadoo la tixgalinayo wax keeni kara la bixidda oo cayiman.. Xaaladaha qaar si guud "dakhliga dheeraadka ah", waxa ay ku xidhan yihiin qiyaasta bilawga oo ah mid waajibineysa inta ay leeg tahay xadiga la dhigayo sanduuqa. Mararka qaarna waxa la dhigaa saami la cayimay oo loogu talo galo la bixid la ogolyahay. Sanduuqyada qaar ma mid waxa la xadeeyaa inta hanti la dhigo karo.

Ujeeddo hawleedka Sanduuqa Xasilantu waxa ay tahay in la yareeyaa deganaansho la'aanta iyo hubaal la'aanta uu qulqulka dakhliga khayraaadka ku leeyahay miisaaniyadda. Deganaansho la'aanta la yareeyaa waxa ay dhankeeda fududeysaa ka ilaalinta kharashagaraynta miisaaniyadda isbadallada ku imanaya qulqulka dakhliga iyo dhigaalka khayraadka ku la isticmaali karo hadhaw marka qiimaha/sicirka hoos –u- dhac ku yimaaddo. Haddaba, marka qiiimuha khayraadku kaco, waxa saadashu noqoneysaa wax lagu kaydin sanduuqa. Sidaa darteed, in aan la ogolaan in uu ku biiro miisaaniyadda- Arintani waxa ay caawin kartaa gacan-ku-haynta miisaaniyadda xadaynta isticmaalka. Marka qiimuhu uu hooseeyo waxa laga filayaa sanduuqani in yareeyo saamaynta (iyad a oo lacago lagu darayo miisaaniyadda) si looga sii hor-dago inuu dhaco wax-kabadal maaliyadeed oo aan la sii saadaalin.

Sanduuqa xasilintu ma yareeyo degananansho la'aanta iyo hubaal la'aanta soo foodsaaraysa dawladda . Yareynta deganaansho la'aanta iyo hubaal la'aanta dakhliga miisaaniyadda waxa lagu gaadhi karaa in la isku-waydariyo yo deganaansho la'aanta iiyo hubaal la'aanta dhinaca sanduuqa.

Labada nooc ee ugu adeegsiga badan hababka wax-lagaga qabto xaaladaha aan la sii ogayn ee la xidhiidha ururinta iyo la bixiddaa hantida

- Xeerar ku xidhan qiimaha kheyraadka ama dakhliga oo hore loo sii qeexay, (Kuwa xadidan ama lagu dajiyo qaaciido). Tusaalelyaal taaagan iyo kuwe hore oo ah sanduuqyo khayraad oo xeerarkan ku shaqeeya waxa ku jira (Sanduuqa Xasilinta Copper-ta ee Chile ilaa 2006), Ruuskha, Suudaan iyo Venezuela.
- Xeerar ku xidhan faraq u dhaxeeya qiimaha(dakhliga) lagu jaangooyay miisaaniyadda sannadka socda-oo laga yaabo in lagu soo saaro qaacido ama hab aan laga baaraan-degin- iyo qiimaha dhabta ah (Dakhliga). Tusaale dalal habkan adeegsada waxa ka mid ah Alberta (tan iyo markii 2004), Algeria, Ghana, Iran (Ilaa 2011), Libya, Mexico, Mongolia, Oman (tan iyo markii 1998), Qatar, iyo Trinidad iyo Tobago.

Qaarka mid ah sharciyada maamula ururinta ayaa sanduuqa xasilinta u rogi kara sanduuq dhigaal.. Haddii istaraatajiyad awgeed la adkeeyo sharciyada maamula (Tusaale ahaan, iyada oo laga bilaabaayo qiime hooseeya xaga dakhliga si loo keydiyo dhaqaale), markaas Sanduuqa Xasilantu sida jirta waxa uu qaataa kaalin kaydin marmar gaaar ah, ugu yaraan markay timaaddo suurogalnimo badan oo la xidhiidha in la hayo xaddi hanti maaliyadeed ah oo kordhaya.

Ulajeeddada Sanduuqa kaydintu waa iney abuuraan kayd hayntiyeed oo loo talo galo faca mustaqbalku . Tani waxa ay u ogollaan kartaa faca mustaqbalka iney ka faaidaysan karaan qeybaha dakhliga ee laga abuuro go'ida kheyraadka dhamaan-kara.

Sanduuqyada Kaydintu waxay leeyihiin xeerar hawl-gal oo adag oo aan ku talo galin is-badal. Sharciyadani waa ay waajib ka dhigaalka i saami go'an oo ka mid ah dakhliga ka soo xerooda khayrad,a ama wadarta lagu shubo sanduuqa.. Tusaale ahaan Sanduuqa Kayda Kuwait ee Faca soo socda, waxa uu waajibinya dhigaalka 10 boqolkiiba wadarta guud ee dakhliga miisaniyadda. Sharciyada lacag ka saaridda sanduuqani wuu kala duwan yahay marmarka qaarna si cad uma qeexna. Baaxaddaa lacag ka saaridda sanduuqani si loo maalgaliyo miisanayaddu waxa ay wadataa saamayn xasilin ah aan ahayn kaliya ujeedda kaydin.

Sanduuqa Maalgalintu , marka loo eego sanduuqyada aan kor ku xusney, waa ka duwan tahay, waxaanu leedahay habab hawl gal oo debecsin oo la-jaanqaadaya dheeli guud ee maaliyadda. Ulajeedooyinkeedo haw-gal ee sanduuqyadani waa in lagu maalgeliyo miisaaniyadda uun. Sanduuqani waxa lagu kaydiyaa waxii dheerraad ka noqda miisaaniyadda waxa sidoo kalena laga maalgaliyo dhinnaanshah ku yimaadaa miisaaniyadda. Sida uu uu hawlgalo marka la eego, sanduuqan waxa ku soo dhaca dhamaan dakhliga khayraadka waxa kale oo sanduuqu maalgaliyaa marka miisaanayadda uu ku yimaaddo yaraansho aan khayraadku keenin, isaga oo lacag dib ugu soo celinaya miisaniyadda.

Si kastaba ha ahaatee, marka laga eego dhaqaalaha aynaan dusha ku xusin, dhaqaalahani iskuma dayayaan in ay hagaan si wacan oo akhlaaqda wanaagsan waafaqsan in laga saaro kharashka kheyraadka ku jira miisaaniyadda. Korodhka iyo hoos u dhaca lacagtu waxa ay ku xidhan tahay sida wacan ee loo maamulo dakhliga kheyraadka, loona dejiyo go'aanno siyaasadeed oo cad cad, oo lagu hagaayo wanaajinta miisaaniyadda. Sidaa si leeg, dakhligani ma laha awoodo lagu tagrifalaayo isticmaalkooda. Dhamaan kharashku waxa uu ku jiraa miisaaniyadda. Sidoo kale, waxa ay siiyaan qorshe cad oo cadaaladeed oo hufan oo u dhaxeeya inuu isku xidho siyaasadda lagu maamulaayo miisaaniyadda iyo korodhka hantida ma-guurtada ah ay sameyso, iyada oo tilmaameysa arrimaha fungibility-ga ah. Maxaa yeelay hababka lagu maamulaayo wixii ka baxsan maalgelintu ee kordhinaaya hantida ma-guurtada ahi waa inuu ku dhex jiraa dhaqaalaha laga soo amaahanaayo ama lagu adeegaayo ee hantida ma guuraanka ah. Keliya haldooraanta uu leeyahay RRCs ayaa leh dhaqaale maalgalineed. Chile, Norway and Timor Leste. Si xiise leh dhammaan tusaalayaashani waxa ay ka kooban yihiin kuwa kordhinaaya koboca horumanineed ee jira.

1. Xulashada Khibrad Caalamiya

Hirgalinta dakhliga Xasilan iyo kan keydsaniba waxay leeyihiin shuruudo ad adag oo ku jaan go'an ugu yaraan hadba siyaasadda dhaqan dhaqaalle ee la tixgalinayaa inta ay leeg tahay. Si kasta oo ay tahay, haddana soo noq-noqodka filashooyinku maaha kuwa meesha ka saaraya "Habba sarreysee" dakhliga kheyraadka (RR) la waafajiyey ama buuxiyey meesha ugu sarreysa ee la rabo. Ama haddii si kale loo dhigo Shares-ka sida; dakhliga ka imanaaya miisaaniyadda. Waa mid Xasilan, oo ay kharash gareynayaan dadka inta dhexe ee macquulka ahi. Si kasta oo ay tahay kala doorashada yareynta siyaasadda miisaaniyadu, iyo waliba dhiirigelinta keydinta dhakhligu. Waa arrin mudnaanteeda leh in la qaato. Hasayeeshee, sinaba uma saameeeyo dakhliga kheyraadku isticmaalka tooska ah ee dadweynaha marka laga tagi waayo in uu leeyahay meelo gaar ah oo waayahooda leh ama caqbadahooda leh.

- **Marka laga eego xagga farsamada**, haddii ay jiri karaan caqabado ah xagga lacageynta hantidu. Iyo waliba haddii ay jiraan shuruuc muhiimad gaar ah u leh dhaqaalaha oo la soo ogaadey ama darsey, waxa ay u baahnaaneysaa shuruudo ad-adag oo loo dhigo dhaqaalahaasi sidii loo isticmaali lahaa in lagu maamulo hantida ma guurtada ah waliba, ama waa iney korodhka cashuurta la barbar dhigo haddii loo heli karo dhaqaale kale oo aan aheyn kan rasmiga ah. Laakiin, haddii dawladdu ay ku jirto xaalad dhaqaalaheedu siyaado yahay. Muuhiim maaha markaasi in laga saaro dhaqaalaha qeybo ka mid ah miisaaniyadda si loo yareeyo kharashaadka, iyo haddiiba ay caqabad tahay lacagteynta hantidu

- Maqnaanshaha caqabadaha lacagteynta hantidu, haddiiba ay xataa dawladu ku jirto xaalad dhaqaale oo siyaado ah, waxbaa laga soo amaahan karaa ama laga soo qaadan karaa xisaabaadka kale ee

hantida ma guurta ah ku jira, si loo kordhiyo ama loo baahi tiro shuruudaha laga rabo dhigashada iyo isticmaalka dhaqaalaha. Maxaayeelay lacagta waxa loo adeegsan karaa habaab fudud oo sahlaaya in siyaabo kala duwan loo isticmaalo. Haddaba waa maxay faa'iidada laga dheefsan karo marka sidan oo kale lacagta la dhigo iyada oo aan la eegin ama tix galin shuruudaha iyo nidaam xisaabeedka khatar gelin kara shuruucda dejisan ee lagu maamulo marka aad amaah dheeri ah dalbaneyso, waliba qiime sare ku rabto? Iyo marka leys bar bar dhigaayo marka dawladdu iska indho tirto shuruucda loo dhigey dhaqaalahan isticmaalkiisa

- Tani waa mid waddo cad oo macquul ah u fureysa **siyaasadda dhaqaale** ka doodideeda leh dhinaca shuruudaha ad adage e dhaqaalaha loo dejiyey. Haddiiba ay xataa dawladdu ku jirto xaalad dhaqaale oo siyaado ah, ama aaney jirinba caqabado lacageynta hantidu. Markey sidaa tahay waxa khasab noqonaaya marka lacag la dhiganaayo in ay saameyn weyn ku yeelan karto xaaladda siyaasadeed ee loo adeegsan karo ama isticmaalo karo dhaqaalaha caadiga ah. Waxa ay ina tuseysaa caddeynta la soo jeediyey, in si kasta oo ay tahay in waxtarka faa'iido ee ay leedahay siyaasadda dhaqaale ama ay ka saareyso kheyraadka dabiicgia ah ee ku jira miisaaniyadda ay noqon karto mid aan caddeyn oo muhmal badani ku jiro. Marka culeysyaddaasi haddaba soo bataaan, ku meel gaadh ahaan si ayey u saameyn karaan isbeddelka ku dhici kara dhaqaalaha oo keeni kara in la ilduufo ama la dhayalsado ama la xanibo dhaqaalaha arrintaasi, waxa ay mustaqbalka saameyn togan ku yeelan kartaa waddama qaar.

- Dhinaca kale marka laga eego, shuruucdani ad-adagi waxa ay leeyhiin muhiimad u gaar ah kharashka miisaaniyadda marka laga eego dhinaca watarka hantida ma guurtada ah iyo maamulka deyntu leeyihiin (ALM). Arrintan waxa aynu ku sii faaqido xagga hoose;

Sida dhabta ah, waxa jira muranno soo noq-noqda oo u dhaxeyn kara dhaqaalaha ad-adag shuruucda loo dhigo, siyaasadda miisaaniyada, maamulidda hantida ma guurtada ah iyo deynteedaba. Shuruucda dhaqaale ee dejisani waxa ay dhiiri geliyaan sugnaanshaha dhaqaale siyaasad hufan leh, iyada oo dhinaca kale ka dardaar warinaaya isticmaalka dheeraad ah ee aan loo baahneynin inuu sababi karo ama yeellan karo caqabado keeni kara cawaaqib xumo weyn oo khatar gelin karta horumarka iyo hiigsiga ulajeedooyinka guud. Arrintani waxa ay dhacdaa uun xaalado gaar ah oo keeni kara iney kharibto muhiimadda la rabo, iyo iney isbeddal weyn ku keeni karto siyaasadda kala horumarineed ee la dejiyey. Kordhinta isticmaalku waxa ay culeys badan ku tahay oo keeni kartaa muran iyo khilaaf ulajeedooyinkii guud ee u dhaxeeyey dhaqaalaha, siyaasadda dhaqaalaha iyo maamulidda hantida ma guurtada ah. Shuruucdani maaha kuwa ku habboon marka loo eego waddamo gaara ah, waana mid keeni karta caqabado gaar ah

Sida qaalibka ah shuruucda dhaqaale waxa ay abuurtaa labac labac leyn xagga siyaasiyiinta ah. Tusaale ahaan sharciga kordhinta dhaqaaluhu waa mid u baahan in la dhigto lacag ama dhaqaale. Laakiin haddii dhaqaaluhu uu hoos-u-dhac ku yimid, waxa muhiim ah in dawladdu ay soo amaahato ama ay isticmaasho hantida kale ee ma guurtada ah ama ay yareyso isticmaalka badan iyada oo badaniyeysa lacag dhigashada. Tani maaha mida ugu muhiimsan ee la sameyn lahaa. Xaaladaha qaarse, shuruucda dhaqaale waa mid u baahan in laga taxadiro si aaney xaalado aan ku habbooneyn caqabado gaar ah la is yidhaa ku xaliya. Tani waxa suurta gal ah iney horseeddo xaalad aan habbooneyn oo aan wanaagsaneyn. Marar badanse, waxa ay arrintani keeni kartaa khilaaf baahsan oo u dhaxeyn kara siyaasiyiinta kala afkaarta duwan. Dhaqaalaha leh shuruucda ad-adagi waa dhici kartaa in isbaddel lagu sameeyo ama la hakiyo ama la iska indho tiro, ama xaaladaha qaar dhaqaalahaasiba meesha laga saaro.

Caddeymo muujinaaya iney adag tahay in dawladaha qaar ay dejiyaan nidaamka ugu habboon ee ay qiimaha khayraadka ama dakhliga lagu tiirsan yahay u habeeyaan. Aad ayey u adag tahay in la dejiyo celcelis ahaan xadiga qiimaha fog ama lagu bilaabaayo inta uu noqon karo ama lagu halbeegi karo kalsoonida laga qabo in lagu go'aan qaato. Waa laga yaabaa iney keeni karto cawaaqib ama soo dhaweyn aan la mahadin. Waxa kale oo laga yabaa iney horseedi karto dhaqaale aan cayineyn oo aan la helin. Sixirka khayraadka keeni kara daganaansho la'aantu waxa kale oo uu horseedi karaa natiijo xun oo aan laga soo waaqsan inta lagu jiro xaaladaha qiimaha rasmiga ah iyo xaaladaha la eegaayo lacageynta hantida iyo waliba ta ugu daran ee uu ku keeni karo deegaanka la dagan yahay ee cawaaqib ah

Tirada dhaqaalaha Xasilani waxa uu yeelan karaa isbeddal ka saari kara meesha soo noq-noqodkiisa, marka laga eego bilawga qiimaha ama dakhliga ku jaango'an marka la xisaabinaayo lacag dhigashada. Si kasta oo ay tahay xaalada keeni karta koboca u dhaxeeya shuruucda dhaqaalaha ee

siyaasadda miisaaniyadda. Isbdeddalka shuruucda ee hadda la sameeyey waa mid ka falcelinaaya isbdeddalka qiimaha caalamaka ku yimaadda. Iyo culeyska kharashaadka ee isku rogaaya iney muhiimad gaar ah siiyaan siyaasadda (Algeria, Kazakhstan, Venezuela, Russia). Xaaladaha qaar hantida ma guurtada ahi waa mid meesha ka baxday (Mexico, stabilization fund 2002).

Keydinta dhaqaale waa mid leh isbaddel ku taxaluuqa sharuucda dhaqdhaaq. Sannadkii 1980-kii iyo 1990-kii shuruucda dhaqaale ee Alaska, Alberta, Oman, Papua New Guinea, iyada oo waddamada qaar isbaddel weyni xaaladaha qaar uu ka muuqdey. Si haddaba leyskugu soo dhaweeyo isbeddalladaasi ama culeyska ay leedahay kharashaadkaasi. Sannooyinkii dambe oo dhan, shuruucda dhaqaale ee Ecuador, Kazakhstan iyo wadamo kaleba waxay ahaayeen kuwa isbeddalay

Aragtida xaaladaha kala duwanaansho ee u dhaxeeya shuruucda dhaqaale iyo ulajeedooyinka siyaasadeed ee soo baxaya. Waddamada qaar ayaa ogolaadey oo doortey in ay u hogaansanaadaan in ay raacaan shuruucda dhigashada lacagta in si ku meel gaadh ah loo hakiyo codsiyadooda. Tusaale ahaan ay ka mid yihiin, sida; Alberta, Gabon, Iran, Sudan iyo Venezuela. Iyo waliba waddamo kale qaarkood, oo ay ka mid yihiin Chad, Ecuador, Nigeria iyo Papua New Guinea, iyada oo laga helay dhaqaalahooda ay ku shaqeeyaan ama siyaasadooda mid aan waafaqsaneyn habka shaqo iyo waliba habka dhamaadka

Waddamo gaar ah ayaa leh waayo-aragnimadan oo sheegi kara arrimahaasi si aad u faahfaahsan

- Venezuela waa waddanka keliya ee awooda in shuruudaha dakhliga khayraadkiisa dhigto dhaqaalaha Xasilan xaalado ama sannado gaar ah, isaga oo adeegsanaaya korodha deynta iyo korodhka sicirka dulsaarka ee uga soo noqoneysa khayraadka hantida ma guurta ah. Marka sida guud arrinta looga eego dhinaca siyaasadda maaliyadda, waxa ay arrintani sababi kartaa in la xanibo oo meesha laga saaro dhaqaalaha lagu shaqeynaayo

- Algeria waxa ay sameysey badanka inay dhigato dhaqaalaheeda iyada oo adeegsaneysa deynta ka soo xaroota shaqada dhaqaalaha laftigiisa

- Gabon waxa ay sameysey iyaduna in ay dhigatey lacag keydsan keydkeeda taasi oo ay ku heshay si hoose iyada oo haddana bixineysay sixir dulsaar oo aad u xad dhaaf ah oo ahayd mid deynta dibadda lagaga lahaa

- Xagga Chad, Ecuador iyo Sudan marka laga eego gudahooda waxa jira dakhli xad dhaaf ah oo loo qoondeeyo nidaamka maamulka jira sidii loo wada gaadhsiin lahaa dakhliga socda. Heshiiska dhigashada lacagtanina waxa uu dhacaa mar mar, walibana gaar ahaan marka daymaha la galo

- Xagga Alaska, mararka qaar dhigashaa la sameeyaa xagga dhaqaalaha ah, iyada oo walibana laga siinaayo dadweynaha qeybsiga dhaqaalaha ku soo hagaaga. (Iyada oo mar marka qaar loo tixgalinaayo si waafaqsan awoodaha lahaansho) halka ay dawladdu ka soo amaahaneyso dhaqaale kale meelo ka baxsan dhaqaalaha jira. Lifaaaqa 2 ayaa arrintaasi si wacan u sharaxaaya oo walibana raacinaaya sida loo kala helaayo ama loo qeybsanaayo dhinaca dadweynaha iyada oo laga eegaayo

Dhaqaalaha Xasilan ee leh shuruucda ad-adagi waa mid hagaya dakhliga miisaaniyadda taagan ee leh mid cusub oo badan oo walibana adag. Laakiin, dhaqaalaha cusubi waxa uu ku qorsheysan yahay hab ay qiime cusub ku saleysan oo wajihi kara dhibaatooyinkiisa. Dhaqaalahani, waxa uu khatar gelin karaa maamulidda hantida ma guurtada ah iyo waliba daynta guud. Haddii dakhligu ka bato miisaaniyada, laakiin ay miisaaniyaddu ku jirto hoos u dhac, waxa iman kara xaalad is khilaafsan oo is burineysa; Haddii loo baahdo in la soo amaahdo dhaqaale la dhigto si uun oo la xidhiidha ama ku taxaluuqa kharashka xisaabaadka. Tani waxa ay ka dhacdey waddamo badan oo ay ku jiraan kuwii ugu dambeeyey sida; Ghana, Mongolia iyo Nigeria (eeg xagga hoose). Dhaqaaalahani waxa kale oo uu sameyn karaa dhiirigelinta nidaam hufan oo qorsheyan oo qiimaha dakhliga khayraadka ee ku jira miisaaniyadda ee aan habeysneyn loogu habeyn karo si nidaamsan Dejinta qiime sareeeya, xagga miisaaniyadu waxa uu kordhin karaa ama keeni karaa mala-awaal ahaan in khayraadkii lala baxo marka lagu jiro fulinta isticmaalka miisaaniyadda. Si guud ahaaneed, kharashku waa mid kordhaya inta lagu jiro sannadka, haddiiiba xataa lagu wareejiyo dhaqaalihii loo baahnaa in la sameeyo. Ugu dambeyntii haddii kharashka miisaaniyada ee sannadlaha ahi ay si taxadir leh ugu dhex go'aamineyso Kharashaadka Wakhtiga dhaw leh. Medium-Term Expenditure Note (MTEF) iyo

waiba iney jiraan lacageyn hantiyeed oo macquul ahi iney sababi karto in loo adeegsado si furan, mar-marka qaarna iyada oo hoos u dhac weyni iman karo sida dusha loogu xusey talada arrintaasi. Dhinaca kale arrintani waa mid u baahan in dib u habeyn macquul ah oo hufan looga saaro lacagtaasi ku jirta miisaaniyadda, haddii dakhliga khayraadku uu ka badan yahay miisaaniyadda la qoondeeyey ama ay keeni karto in lacagtaasi in ay hoos u dhac soo noq-noqosho xun leh ay abuuri karto

Qeybo ka mid ah dhaqaalaha cusubi ee leh shuruucda ad-adagi waxa uu muujinayaa mushkilado xaga isku xidhka ah, oo ka dhex jira siyaasadda miisaniyadda ee lagu hagaayo hantida ma guurtada ah, ka dib marka ay sannooyin yar uun shaqeyso. Xaaladahan oo dhami waxa ay u baahan yihiin in la dhigto lacag dhaqaalaha miisaaniyadda iyada oo aan laga warwareynin khataraha ku gadaaman ama xeeran miisaaniyadda guud ee sababi kara mushkilado. Eeg sanduuqa koowaad ee tusaalahan layna siiyey

Sanduuq 1. Hordhaca Calaamadaha sheegaya in culeys jiro xagga dhaqaalaha khayraadka cusub ee leh shuruucda ad-adag

Ghana. Markii uu bilaabmey socodka dakhliga saliida ee Petroleum Revenue Management Act (PRMA) ee 2011-kii, waxa markiiba la aasaasey nidaam hufan oo dakhliga saliida lagu fidinaayaba. Dakhliga saliida iyo waliba qoondeyntiisaba. Dhammaan dakhliga saliida ee ay helaan waaxda dhaqaalaha saliidu ee ay hayaan, waxa uu noqdaa mid loo qaybiyo ama qoondeeyo iyada oo loo eegaayo nidaamka wacan ee miisaaniyada hal ama laba saliida dhaqaale ahaan ku saleysan.

Dhaqaalaha Xasilan iyo waliba kan dhaxaltooyo. Ee ah" qiyaasta dakhliga ee shidaalka", waxa lagu qeexaaa inuu ku saleysan yahay sooyaal hore, iyada oo laga eegaayo shanti sanno dhaqdhaqaaq qiimaha celcelis ahaan ay saliidu sameeysey. Dakhliga la helo sannadkii ee dhaqaalaha maalgashi ee xadigiisa (ABFA), waxa ay ka timaadda dakhliga saliida oo aan ka badnaanin boqolkiiba 70 dhaqaalaha guud ee ka soo xarooda shidaalka. Boqolkiiba todobaatanka ABFA ee sannadkii laga helo shidaalka waxa lagu maalgeliyaa dadweynaha. Labada dhaqaale ee saliida laga helo waxa ay ka badan yihiin ABFA iyada oo laga eegaayo xadiga cayiman ee shareleyda. Ka dib laba sanno iyo badh hirgalintii PRMA, wasaaradda Maaliyadda iyo daneeyayaashu waxa ay xaqiiqsadeen oo ogaadeen inay jiraan caqabado keeney cawaaqib xumo xaga maamulka iyo hawl-socodsiinta ahi in ay ka dhex jirto nidaamka, taasi oo u baahan in la caddeeyo oo la sheego sida ay aragtida ay soo gudbiyeen iyaga la tahay (Ghana 2013). Si kastaba, qiyaasta sare ee dakhliga shidaalku waxa ay qeexaysaa in ay keeneyso qiyaas lagu ogaanaayo in shidaalka cadadkiisa iyo qiimahiisuba ay muujinayaan midnimo la'aan iyo warwar baahsan oo loo beddeli karo ABFA iyo labada dhaqaale ee saliida. Halka Beddal dhaqaale lagu sameeyey Sannooyinkan dambe, ay iyaduna waa dawladdee ay la taag darneyd hoos u dhac weyn. Sannadkii 2013-kii dhaqaalaha Xasilani oo keli ahi waxa uu helay isbeddallo sare oo ah ABFA, halka hoosu dhaca dawladduna uu keeney boqolkiiba 10 ka mid ah GDP-ga. Dawladdu hadda waxa ay dib u eegeysaa PRMA-ga

Mongolia. Xeerka daganaanshaha Miisaaniyada (FSL), waxa la ogolaadey sannadkii 2010-ka si loogu maamulo korodhka dakhliga macdan qodista iyo in waliba lagu horumariyo daganaanshaha miisaaniyada iyo nidaamkeedaba. Waxa loo dejiyey FSL saddex sharci miisaaniyadeed iyo waliba kaydin iyo deganaansho dhaqaale. Shuruucda miisaaniyadu waxa ay ka kooban tahay kuna xadidan tahay qaabdhismeedka hoos u dhac miisaaniyadda, korodhka kharashaadka iyo daynta dadweynaha. Hoos u dhaca qaabdhismeedkiisa waxa lagu qeexi karaa inuu yahay faraqa u dhaxeeya dakhliga cayiman iyo kharashka. Halka dakhliga qaabdhismeedka macdantu isagana lagu qeexaayo mid loo raacaayo 16 sanno ka hor sidii loo dhigey iyo celcelis ahaan qiimahii hore ee macdanta iyo qiimaha la siin doono mustaqbalka. Sharcigani waxa uu dhaqangal wanaagsan noqdey sannadkii 2013-kii. Iyada oo kaabis *"recalibrated"* lagu sameyn doono afartii sannaba mar.

Dhaqaalaha kaydsan iyo kan Xasilaniba waxa helaan isbeddalo kaga imanaaya marka miisaaniyadu ay hesho dakhliga macdan qodista ah ee saxda ahi inuu ka bato dakhliga Xasilan ee la qeexay. Faraqa u dhaxeeya labadoodu waxa loo qoondeeyaa dhaqaalaha. Tani waa mid u baahan in la hirgaliyo baahida dhabta ah, haddii ay ku badato miisaaniyada hoos u dhacu. Sannooyinkii dambe isbeddaladii dhaqaale ee la sameeyey waxa ay keenen in dakhliga macdan qodistu uu ka bato dakhliga joogtada ah. Halka ay dawladduna la tacaaleysey hoos u dhac ku yimid oo ah qiyaas ahaan 11-13 boqolkiiba xagga GDP-ga. Isbeddaladaasi waxa lagu maalgaliyey amaahdii dawladda, sidaa oo ay tahay lamaba soo ururin waxba haba yaraatee dakhlig hantiyeed.

2. Dakhliga khayraadka ee dawladdu ku isticmaasho iyo Nidaamka Maamul xisaabeedka hufan ee Dawladda PFM

Tiro dhaqaale ayaa loo qaabeeyaa si kooxo gaar ah oo kale oo leh awood ay ku aqbalaan ama bilaabaan kharashka aan miisaaniyadda ku jirin ama khayraadka dadweynuhu u baahdaan. In ka mid ah dhaqaalaha qaybta la hayo, ama hayey, ayey ahayd in dawladu ay ku adeegsato ama maalgashato hantida ma guurtada ah ee ay leedahay gudde ahaan iyada oo laga soocaayo dhaqaalaha. Waa arrin muhiimad leh in la kala saaro farqiqa u dhaxeeya cudurdaarka ay la yimaadeen afartan amuurood ee hoose

- Ta koowaad waa " Meesha ka kac" "get around" daciifnimada nimaadka PFM-ku iyo waxtar la'aantiisu ama nidaamka dhaqaale ee musuqmaasuq. Waa mid u baahan in loo qoondeeyo dhaqaale ka baxsan nidaamka iyo dabagal wacan oo lagu ogaanaayo siyaasadda lagu adeegsanaayo hanaan wacan oo wanaagsan dhaqaalaha, waana (goobtii wacneyd dood ahaan)
- Ta labaad waa aragti wacan oo macquul ah looga ilaalinaayo in la isticmaalo xadi badan ama la galo kirooyin badan si loo ilaaliyo khayraadka aan ku jirin miisaaniyadda ayna maamulaan koox ka baxsani,

- Waddamada qaar ayaa tixgalin weyn siiya in dhaqaalaha lagu taageero horumar iyada oo ay masuul ka yihiin dadweynuhu si loogu maalgaliyo mashaariic horumanineed, dhismayaal, waddooyin oo bulshada waxtar weyn u leh dhinac kasta, iyada oo la gaadhsiinaayo in dadweynaha loo shaqeeyo. Mararka qaar dhaqaalahu waxa uu dhiiri galiyaan uun ugu yaraan qaybo, iyada oo waliba xoogga la saaraayo horumarka siyaasadda dhaqaalaha. Tani waxa ay ku tuseysaa in RR in la hirgaliyey, loona isticmaaley hab wacan

- Dhaqaalaha qaar ayaa loo ogolaadaa, ama lagu dhiiri galiyaa, in lagu maalgaliyo xisaabaadka hantida ma guurta ah ee guddaha waddanka, iyada oo laga eegaayo ulajeedooyin kala duwan oo ay ku jiri karto horumar, iyo in si wacan loo maamulo hantida ma guurtada ah

Dhaqaalaha waxa loo isticmaali karaa ama qoondeyn karaa khayraadka dadweynaha habab kala duwan

- In dhaqaalaha si toos ah loo isticmaalo, aan ku jirin miisaaniyadda

- Arrintani waa mid u baahan sharci iyo xeerar si loo helo waxtar, loo beddeli karo dhaqaalaha intiisa mudan iyada loo kala saaraayo qeybo isticmaal

- Waxa ay keeni kartaa in la kabo miisaaniyadda aan la isticmaalin ama deynta guddaha waddanka ku wajahan dadweynaha ganacsigooda iyo shirkadahoodaba

- Waxa loogu qeybin karaa dhinaca maalgashiga hab cadaalad ah, gaar ahaan shirkadaha waddanka guddihiisa laga leeyahay

- Waxa ay ka qeybqaataan ulajeedooyinka wacan ee baabuurta loogu maalgalinaayo si wada jir ah shirkadaha dadweynaha

- Waxa ay damaanad qaad ka sameeyaan SPVs sidii shirkaddaha dawliga ama dadweynihu ay iskaga bixin lahaayeen daymaha soo bixi kara

Dhaqaalaha Khayraadka la isticmaalay waxa ay abuureen su'aalo aas aasi ah oo ku saabsan PFM-ka

- Sidee loo qaabeeyaa muhiimadaha kharashka isticmaalkiisa guud ahaan?

- Kharashkee ayaa laga maalgalinayaa miisaaniyadda, iyo waliba dhaqaalahee, iyo sababta?

- Miyuu kharashaadka oo dhan ay ku jiraan dhaqaalaha la sameeyey. Ee ka gudbey tijaabada iyo kala horumarintaba?

- Miyuu kharasha dhaqaalaha uu ku jiraa miisaaniyadda isku dhafan ee loo gudbiyey xeer dejinta?

- Haddii dhaqaalaha laga helo dakhliga uu yahay mid isbeddalaaya ama aan la saadaalin karin, sidee baa haddaba looga ilaalin karaa inuu isbeddallo kharashaadkuna, iyo walibana sidee loo hubin karaa inuuna halkiisiii uun taagnaanin

- Waa maxay kharashaadka la balanqaaday iyo wax iibsigu nimaadka hufan ee loo adeegsan doonaa?

- Miyey kharashaadka dhaqaalaha iyo daymaha la filaayo iney soo baxaan ay leeyihiin hab lagu xafido, xisaabiyo, baadho, qoro iyo hab shaaca looga qaado xogtoodaba?

- Side looga hortagi karaa khatarta badan ee ay keeni karto in dhaqaale la qaataa?

- Sidee khatarta muuqata ee siyaasadeed ee halista ah looga guuleysan karaa, marka laga eego dhinaca maalgashiga guddaha iyo warwarka ay muujiso dawladdu?

Khayraadka Dhaqaalaha guddaha lagu isticmaalo ee keeni Kara khatarta:

- ***Xasilan.*** Maalgalinta iyo kharashgareynta dhaqaalaha hantida ma guurtada ahi, waxa ay u rogi karaan dakhliga khayraadka mid is bedbedalaaya xagga dhaqaalaha qofka iyo mid joogteysanba. Maalgalinta wakhtiga habbooni iyo maalgalinta wakhtiga xuni waxa ay bilaabi karaan iney nadiifiyaan kharashka iyo iney kiciyaan isfahnwaaga ulajeedada siyaasadeed ee dhaqaalaha. Haddiiba uu dhaqaaluhu u shaqeeyo hab ilaalinaaya “buffer” maaliyadda, hantida ma guurtada ah laguma haysan karo guddaha waddanka, maxaayeelay habkan ilaalineed way adag tahay inaanu wax yeeleynin dhaqaalaha intiisa kale.
- ***Tartan ee dhoofinta aan dawliga ahayn khayraadka.*** Isticmaalka khayraadka dhaqaalahan waddanka gudihiisu waxa ay ku kordhineysaa uun culeys badan isticmaalkiisa. Waxa kale oo ay ku tabaruceysaa hoos u dhaca sixirka saxda ah wakhtigiisa. Tani waa caqabad weyn xagga isbdedalka dhaqaale
- ***Laba Miisaaniyadood:*** Haddii kharashka loo adeegsanaayo in lagu bilaabo isticmaalka waddanka gudihiisa, oo ay barbarsocoto miisaaniyadu, waxa ay abuuri kartaa hoos u dhac ku yimaadda heerka caadiga ah ee miisaaniyadda ee leh muhiimadda qalabka maamul ee miisaaniyadda
- **Dawlada iyo Kiro Raadinta:** Waddamada leh xukumadaha daciifka ah, iyo miisaaniyad hufani, waxa maskaxda laga fahmi karaa in khayraadka ay haystaan ay u adeegsadaan waddanka gudihiisa, oo ay ku jirto iney maalgaliyyaan shirkado gaadha guulo waaweyn. Tani waxa ay abuuri kartaa ama xoojin kartaa iyada oo dhiirigalineysa in la helo siyaasad cad oo dadka kirada rabaa ay ku soo dhiiradaan, oo ay dhamaan isku darka tirada hantida ma guurta ah lagu karodhin karo.

Awooda lagu isticmaalayo dhaqaalaha waddanka gudihiisu, waxa ay u horseedi kartaa dhibaatooyin xagga tirada RRCs-ka: Caqabadaha lala kulmey waxa ka mid ah; isku duwidda kharashaadka iyo hagidda mushkiladaha (sida, kharashaadka soo noqnoqda, isticmaalka hantida badan ee aan go’aan la gaadhey ku fadhiyin, ee sababi karta caqabada ah in mustaqbalka dib aan loo isticmaali karin kharash) labada miisaaniyadood, kala qoqobnaanta siyaasadda, saameyn la’aanta, sida xun ee loo qeybinaayo khayraadka, arrimaha xukummadda, khatarta miisaaniyadda, iyo maamulxumidda guud, Dhibaatooyinkani waa kuwa khatar ku ah RRCs-ka dhammaan waddamadasi, maxaayeelay isbeddalka cimilo ee dakhliga khayraadku iyo siyaasadda dhaqaale ee la isticmaalayo dakhliga kirada. Sanduuqa labaad ayaa tusaalayaal inaga siinaaya Ina tusaaya sida wax u kharibmeen

Sanduuqa 2. Dhaqaalaha Khayraadka iyo Isticmaalka dheeraad ah ee Miisaaniyadda

Waddanka Nigeria sannadkii1990-kii, dhaqaalaha aan miisaaniyadda ku jirin ee laga maalgaliyey dakhliga saliida ka soo xaroodaa waxa uu noqdey mid xad dhaaf ah xagga isticmaalka miisaaniyadda, iyada oo aaney jirin isku xidh, iyo in mashaariicada wasaaradaha isku shaqada ahi ay soo noqnoqdaan, sidoo kale nidaamka lagu kala saaraayo mashaariica ama kala dooranayaana

waxa ay ahayd mid liidata oo aan laheyn hab wacan oo lagu maamulo maalgalinta aan ku filneyn-ba. Xisaab xidhka sannadlaha ah lama soo saari jirin, ama lama soo saari jirin mar dambeba. Xisaabaadka lacagahana muu baadhi jirin mana eegi jirin hanti dhawraha guud.
Natiijada arrintaasi, tiro badan badan oo mashaariic la maalgaliyey ayaa u baahdey kharash badan oo kale oo lagu maalgaliyo iyaga oo soo celinaayey lacag yar oo hoose. Dhammadkiina, dhammaan dhaqaalahaasi wey joogsadeen. Waaxda maalgalinta dhaqaale ee Venezuelan-na waxa ay hirgalisey xeer qeexaaya habka lacagta saliida loo qeybsanaayo sannadkii 1970-kii. Markiiba khayraadkaasi waxa loo leexiyey iney shirkadaha dadweynuhu si isleeg uga qeybqaataan. Kuwa faro badan ayaa ku Kacey oo ku guuldareystey, waxaney lacag badan galiyeen oo ay kaga baxdey xagga maalgashiga laydhka si ay u kabana dhaqaalihii ka lumey.
Bilawgii xaaladaba, Alberta's Heritage Savings Trust Fund waxa ay sameysey iney lacag hoose oo dulsaar ah ku maalgashato beeraha dawladda. Iyada oo ku bilawdey lacag aan miisaaniyadda ku jirin oo lagu horumarinaayo adeegga bulsho iyo kaabayaasha dhaqaale. Walibana ay damaanad qaad ka sameysey daymaha meelo ay xoogga saartey. Natiijadii ugu xumeyd ee laga dhaxaa, waxa ay noqotey in daymo badan layska bixin kari waayo, taasi oo ku keentey dhaqaalihii in dib loo kabo oo uu xumaado
Waaxda maalgashiga Libyana waxa ay bilawdey iney muhiimad gaara siiso isticmaalka dheeriga ah ee miisaaniyadda, waxaana laga soo wariyey in ay ku keentey hoos u dhac maaliyadeed oo ah maalgashigii caalamiga ahaa ee ay dibadda ka wadday. Tani waxa loo aqoonsan karaa, iney sabab u ahayd inaaney laheyn khuburo xeeldheerayaal ah. Mushkiladaha dawlada iyo ka maqnaanshaha nidaam cadaaladeed oo hufan oo lagu maamulo miisaaniyadda

Sida tooska ah, waxa jira caddaymo aan macquul aheyn oo aan dhammeystirneyn oo taageeraya sheegashada in dakhliga khayraadka la isticmaalaa yahay ka u sarreeya ee miisaaniyadda isticmaalkeeda iyo waliba (goobtii wacneyd dood ahaan) ee RRCs-ka. Xaqiiqdii tiro xaalado ah, oo dhaqaale aan cadaalad ku saleysneyn lagu kharashgareeyey hawl maalmeedyo la galay, waxa ay faa'iido daro ku keentey sharciyadda iyo taageeridda dadweynaha wakhtiyo kala duwan oo ulajeedooyinka siyaasadda miisaaniyadda lala xidhiidhiyey dhaqaalaha hawl-socodsiinta. Dhaqaale tiro badan ayaa hoos u dhac ku yimid wakhtiyo badan ka dib markii culeys xoog badan oo lagu xodxodonaayey in kharashka la galaayo lagu kordhiyo kharashaadka ka baxsan miisaaniyadda. Xaaladaha qaarkoodse, khibrad la'aantu waxa ay ku keeni kartaa dadweynaha mararka qaar iney lumiyaan dhaqaale badan oo adeegyadooda iyo la xisaabtankka ay ku kordhin lahaayeen. Arrintani waxa ay keentey warwar khatar badan oo ku saabsan in adeegsiga wacan, kala horumarinta wacan iyo sida wanaagsan ee loo isticmaalaayo kharashka. Sidoo kale, waxa intaasi dheeri ah in hirgalinta miisaaniyaddu ay saameyn taban ku yeelan karto horumarka suuban ee nidaamka PFM-ka, iyo in khayraadku yaraado, iyo iney yareyn karto ka war heynta ama ogaanshaha halbawlaha miisaaniyadda

Rejada dhaqaalaha Kheyraadka lagu taageeraayo horumarka, iyada oo la maalgalinaayoa ama guddaha waddanka lagu kharashgareynaayo, waa arrin mararka qaar la soo jeediyo in dhaqaalaha khayraadkaasi ama marka la helo qulqul ka mid ah khayraadka dakhligaasi cusub. Tani waa mid u baahan in la kala caddeeyo, waayo, aragtiyaha qaar ayaa sheegaaya in Isfahan waa badani ka dhex jiro sida loo kala leeyahay hab maamulka dhaqaalahan qeybihiisa aan gaadhsiisneyn in ay la socon karaan ama arki karaan xisaabaadka dadweynaha

- Go'aanka isticmaalka khayraadka iyo dakhliga kale ee dadweynuha isticmaalkiisa iyo maalgalintiisuba maaha mid madax banaan haddiiba dhaqaaluhu yahay mid yaalla. Jiritaanka dhaqaalahani, ama arrimaha dawliga ahi, maaha kuwa la xidhiidha arrimaha siyaasadda ee qorsheysan ee ah sida loo adeegsado khayraadka dadweynaha, iyada oo lagu taageeraayo horumarka.

- Muranka ka taagan ujeedooyinka dhaqaalaha loogu isticmaalo horumarinta, waxa ay keentey iney aragti ka qaataan dakhliga khayraadka cusub (RR) ama dhaqaalaha khayraadku waa mid mararka qaar "Gaar ah" ama ka duwan khayraadka xukumadda ee kale, waana in la ilaaliyo oo la dhayo, iyo in loo isticmaalo siyaabo kala duwan. Si kastaba ha ahaatee, mararka qaar RR waxa uu ka mid noqdaa hanitda dakhliga ah. Waxa uu noqdaa mid ka mid ah uun khayraadka badan ee dhex cagaaga, ee loo adeegsado ulajeedooyinka kale duwan.-RR waa mid isbeddali Kara, laakiin kheyraadku waa kuwa aan maan guureynin/isbadalin. Ma cadda sababta kharashka isticmaalka

horumarku uu u yahay mid aan u kala Saar saarneyn qeybo kala duduwan oo loo isticmaali karo kharashkaasi, ama sababta uu kharashka dhaqaalahaasi uu u wato isticmaalkiisa gaarka ah. Marka hawl qabadka dawladda oo dhan laga maalgaliyo xaqiiqdii meel kaliya khayraadka, waxa ay keeni kartaa qaabdhismeed siyaaasadeed oo aan mideysneyn. Haddiiba ay jirto rajo ah in la taageero horumarka, si loo kordhiyo isticmaalka kharashka dadweynaha, maxaa yeelay, dakhligaa kordhaaya. Tani waa mid ay sameysey uun miisaaniyaddu. Taasi oo Ina tustey in badan si cad inuu u kordhey isticmaalku, iyada oo la barbar dhigaayo isbdedalka hoose ee dhaqaalah. Ama wixii kale ee la midka ahba.

Hawsha isticmaalka masuuliyadda maalgalinta ee dhaqaalaha khayraadka kale ay u horseedi karto muran ama is fahan waa ku saabsan dhaqaalaha ka soo horjeeda suurta gal ahaanta iyo mushkiladaha hore looga shaqeeyey ee dhaqaalaha la ogaaday. Haddii aad loo eego, ama shuruudaha lagu bilaabaayo, isticmaalka waddanka gudihiisa ama maalgalintiisu waxa ay u taagnaan kartaa in lagu gaadho guul iyo horumar la qaadan karo oo yareyneysa khatarka ka iman karta lacagta soo noqoneysa ee hantida ma guurta ah ee dhaqaalaha la hayo ku jirtaa ay kaafin karto xaaldaha marka la lacageynaayo hantida ma guurta ah. Tani waa mid sidoo kale ka hortagi karta dhayalsiga masuuliyadaha, hanaanka maamul ee dhaqaalahani waa mid sheegaaya in natiijada xisaabaadkani ay qeyb ka yihiin hufnaanta siyaasadeed ee xooga la saarey sidii loo xoojin lahaa shuruudaha adag ee waxyaabaha aan ganacsiga ku saabsaneyn ah.

2.1. Maalgalinta Hantida ma guurtada ah ee waddanka gudihiisa

Xukumadaha qaar ka mid ah ayaa ogolaada ama dhiiri galiya dhaqaalahooda, iney noqdaan kuwa aan khayraad aheyn, SWFs ama dhaqaalaha khayraadka, si loogu maalgaliyo hantida ma guurta ah ee waddanka gudihiisa. Maalgalinta dhaqaalaha waddanka gudihiisu waxa ay sababi kartaa in si niyad ah ay u dhismaan ama u kobcaan ganacsigu, iyada oo qeyb ka noqoneysa hanaanka wanaagsan ee lagu hirgalinaayo maamulidda hantida ma guurtada ah, si guul looga gaadho kala duwanaanshaha dhaqaalaha ee hantida ma guurta ah iyo hantida dhammeystiran ee wacan ee soo noqoneysa. Iyada oo barbar socota yareynta khatarta ka iman karta in la qaato wakhti laysku tagaayo in laga midho dhaliyo hawlqabad cayiman. Ulajeedooyinka kale waxa laga yaabaa iney ku jirto in la rajo galiyo sidii loo caawin lahaa horumarka dhaqaale ee qeybaha ganacsiga dadweynaha. Tusaale ahaan iyada oo la maalgalinaayo hantida waddanka gudihisa, iyo hantida kale ee waaweyn ee waddanka gudihiisa, iyo sidii loo soo jiidan lahaa maalgashi caalami ah.

Maalgalinta dhaqaalaha waddanka gudihiisu waa kala duwan tahay noocyadiisu. Mararka qaar waa maalgashadayaal xisaabaad oo ganacsi la ah amaanka. Laakiin marar badan waxa ay sameeyaan maalgalin dhaqaalaha gaarka loo leeyahay, iyo mashaariic ka baxsan magaalooyinka oo aan horumar aheyn oo ay ku jirto dhismayaal waddooyin ama kaabayaal dhaqaale. Maalgashigani waa mid ganacsi gabi ahaantii, ama mid ganacsi u eeg ama u qaabeysan si strategic ah. Iyada oo loo dooranaayo si aan wacneyn oo ku wajahan guryo garasho

Isticmaalka SWFs- Waa ku jirtaa dhaqaalaha khayraadku, ee maalgashiga xisaabaadka waddanka gudihiisa ahi inuu yahay mid su'aal iyo doodi ka taagan tahay

- Gacan keliya, waxa lagu doodi karaa iney tahay wax xun. Waddamada aaney ku filneyn hantidoodu waxa ay awoodaan iney helaan dakhli badan oo u soo noqda oo wacan oo uga imanaaya maalgashiga gurigooda intii ay maalgashan lahaayeen dhaqaalaha suuqa adduunka. Tani waa mid dheer oo waddamada qaar aaney joogteyn karin habka nidaamka ay gaarka u leeyihiin ee SWFs, iyaga oo xasilinaaya ulajeedooyinkooda kale.
- Dhinaca kale, waxa jira warwar ku saleysan tayada wanaagsan ee hantida ka so noqon karta dhaqaalaha hantida ma guurtada ah ee waddanka gudihiisa. Maxaayeelay, qofka hantida lahi, xukumaddu, waa kooxda kaliya ee dhiirigalineysa maalgashiga in aanu sidoo kalena keenin wax khilaaf ah

Khayraadka dhaqaalaha qaadaya jihadani waxa uu keeni karaa hoos u dhac ku yimadda hawlsocodsiinta arrintan. Si gaara, waxa ay u adeegsan karaan sidii ay iskaga ilaalin lahaayeen caqabadaha ku xeeran isticmaalka miisaaniyadda. Iyo kordhinta shares-ka marka laysku daro dhamaman taasi oo keeni karta in aaney macquul sax aheyn adeegsiga khayraadka dhaqaalahaasi. Hawlaha xisaabeed ee waddanka gudihiisa ka jiraa waxa ay taageeri karaan iney kordhiyaan xasiloonidarada isticmaaleed ee baahsan. Iyo korodhka qorsheysan ee socda. Xaaladaha gaarka ahi waxa ay xidhiidh toos ah la leeyihiin

dhaqaalaha lagu maalgalinaayo hawl socodsiinta miisaaniyada, iyo sidii loo abuuri lahaa meel mar wacan oo gaadhsiin kara inuu ilaaliyo ama dhawro, kalsoonida iyo go'aanadda xisaabaadka maalgashiga.

Farqiqa u dhaxeeya khayraadka dhaqaalaha iyo ka aan aheyn SWFS waa in maskaxda lagu hayaa. Khayraadka aan dhaqaalaha aheyn waxa laga soo dheegey dhaqaalaheeda hantida aan khayraadka ahayn, sida tabarucaadka hawlgabka, qeybaha kala duwan ee aan khayraadka aheyn SWFs-ka, ay ku jiraan Temasek and the New Zealand Superannuation Fund. Iyada oo samesey horumar wacan. Dhaqaale badan oo hawl gabka dadweynaha ah ayaa isku rogey mid aad u xoog badan maalgashigiisu dhaqaalaha waddanka gudihiisa. Dhaqaalaha khayraadkaasi, si kasta oo ay tahay, waxa uu wajahay in aad loo isticmaalo oo culeys badanina kaga yimaado-dadweynaha kale ee leh hantidani, iyaga oo si cad uga duulaaya in loo qeexo yareynta qiimaha ulajeedooyinka hantida ma guurtad ah. Kuwani maaha kuwa ogol la xisaabtan dhab ah oo kaga imaneysa qeybaha daneeyayaasha ah ee taageera dhaqaalaha hawlgabka, iyo cashuur bixiyayaashaba

Khatarta siyaasadeed ee laga xoojinaayo korodhka ganacsiga iyo xoog ku galiddiisaba iyada oo lagu fidinaayo dhaqaalaha maalgashiga xisaabaadka waddanka gudihiisa ah. Intii uu hoos u dhacey RR, haddii culeys badani ku yimid miisaaniyadda, dhaqaalaha khayraadka waxa loogu yeedhi karaa iney caawiyaan miisaaniyadda xisaabta. Iyada oo xoog lagu iibinaayo hantida ma guurtada ah ee waddanka gudihiisa, wakhtiga uu hoos u dhaca ku yimaaddo sixirku.

Waxa jira habab lagu xejin karo khatarta, marka dhaqaaluhu bilaabo dhaqdhaqaaq waddanka gudihiisa ah. Aas-aas ahaan dhaqdhaqaaqani waa iney xadidaan ganacsiga "U dhaw ganacsiga" la gaadhey.

- Dhaqaalaha maalgashiga waddanka gudihiisa ah ee uu sameeyey waa in la tix galiyaa xagga deegaanka guddaha, si qorsheynta maalgalinta dadweynaha iyo isku xidhka dhammaan ganacsiga waaweyni ay u helaan joogteyn waarta mar walba, ugana hortagaan ganacsiga koraaay waxyeeladiisa

- Waa inaan dhaqaalaha lagu maalgalin mashaariic aan laheyn cudurdaar bilaw u ah hanaanka dhaqaale ee bulshada arrimaheeda ka baxsan; Mashaariicdaasi waa iney ku jiraan miisaaniyadda, dhaqaalaha lagu maalgalinaayo mashaariicdaasi waa inaaney dhalan gadiyin dhaqaalaha maalgashiga

- Xaqiiqii, waa in uu xadidaa maalgashiga dhaqaaluhu ganacsiga, iyo ganacsi la moodkaba si ay u bilaabaan in suuqa xorta ah iyo Kan kaleba ay soo celiyaan dhaqaaale. Tani waxa ay ilaalineysaa oo dhawreysaa in hantidu si guud mar ah ay iskugu bedesho dhaqaale shaqeynaaya. Halka maalgashigu aanu aqbaleynin si ilaha ganacsigu aaney adkaanin sinaba iyada oo laga cabirqaadanaayo horumarka wanaagsan iyo la xisaabtanka suuban ee dhaqaalaha. Sida aan dusha ku sharaxney

- Qeybinta maalgashiga waddanka gudihiisu waa inaaney noqon mid xadidan marka laga eego isku darka dhammaan xagga shares-ka. Laakiin in si weyn loo qeexaa iyada oo laga duulaayo tartanka hantida ma guurtada ah ee dibadda. Wakhtiga uu hooseeyo wax soo noqodku waddanka gudihiisa, ama marka ay jiraan astaamo sheegaaya in hantida ma guurta ahi ay sida xumbada u gudheyso. Maalgashiga waxa loo wareejin karaa dibadda. Haddii mashaariicda maalgashigu ay si cad u qeexayaan ulajeedooyinka horumarineed, tani waa mid wali sii xoojineysa iney lid ku tahay dhaqaalaha ka soo noqonaaya hantida ma guurtad ah ee dibadda. Laakiin gunnooyinku waa kuwa laga sameeyey dhismaha oo loo dejiyey nidaam habeysan oo leh shuruudihiisa cayiman si loo gaadho yoolkiisa.

- Dhaqaalahani waa inuu keliya si toos ah u bilaabaa inuu isku darka dhammaan tirada maalgashiga ah ee ay leeyihiin dadka laga tirada badan yahay ee hantida lahi aaney la kulmin caqabado hor leh. Kaalmeynta maalgashiga gaarka ahi, waa inuu keena khuburo iyo waliba share- mashaariic khatar aheyn.

- Cadaalad iyo hufnaan xooggan oo dawladda gudaheeda iyo dibaddeeda ahi waa arrin qoraal ahaan muhiimadeeda gaarka ah leh. Qoraagu waxa uu raadeynayaa si faahfahsan inuu ka dalbanaayo

dhammaan kooxaha nimaad hagaagsan oo qurux badan oo lagu soo dhiirado si loo maalgashado waddanka gudihiisa iyada oo loo eegaayo qawaaniinta aan hore u xusney ee jira inuu buuxiyey iyo in kale waddankaasi.

3. Isku dubaridka Hay'adeed ee Sanduuqa lacageed

Abuurista sanduuq lacageed waxa ay u baahan tahay go'aano la xidhiidha sida ay qayb uga noqoyso saab-hawleedka dawladeed, nidaamka maaliyada, iyo maamulka hantida iyo daynta. Arintani waxa ay saamayn dambe ku yeelanaysaa isku-dubaridka hay'adeed ee lacagta.

Wadamo ayaa hirgaliyey qaabab maamul oo kala duwan oo hayado lagu hoos geeyo lacagta ka soo xeroota khayraadka. Sanduuqaa lacagta waxa laga yaabaa in ay si dhexe u maamusho wasaarada maaliyadu. Waxa laga yaabaa in ay maamusho wasaarada maamul ahaan hoos iman karto ee ku haboon, tusaale ahaan wadamada khayraadku ceegaago, wasaarada tamarta ayaa maamusha am acid la mida, ama wasaaradaha kale ee maamul ahaan ay hoos yimaadaan maamulka sanaaduuqda lacageed ee horumarinta. Sanaaduuq lacageed oo faro badan ayaa loo abuuray in ay ahaadaan hay'ado maamul ahaan madax-bannaan oo leh masuuliyado kala duwan iyo heerar kala duwan oo ismaamul iyo heerar xisaabtan oo kala sareeya.

Sanaaduuqda lacageed waa in ay uga qayb noqdaan nidaamka diyaarinta miisaaniyada qaab hufan oo la fahmi karo. Iyada oo ay ku xidhan tahay nidaamka maamul iyo masuuliyadeeda, waxa laga yabaa in lacagta laga helo khayraadku in ay caawiso ama carqaladayso nidaamka miisaaniyada si ay u kafayso ujeedooyinkeedii asalka ahaa. Is-waafajinta haboon ee miisaaniyada iyo sanduuqa lacageed waxa ay caawinaysaa in la sii wado maamul midaysan oo ay yeelato siyaasada maaliyada. Waxa ay sidoo kale sahlaysaa kala mudnaan-siin sugan oo timaadaa dhammaan hawl-galada dawlada.

Jiritaanka sanduuq lacageed waxa uu u baahan yahay in aanu ka dhignaanin abuurista nidaam-hawl qabad hay'adeed oo cusub. "Sanduuqa Lacageed" waxa laga yaabaa in uu noqdo sanduuq lacageed oo magac ahaan u jira. Nidaamkan xisaab lacageed uun ah waxa uu noqdaa sanduuq "lamood", maxaa yeelay ma jiro haykal maamul oo gaar ah oo maamula sanduuqa, dhammaan lacagta dakhliga ah iyo ta kharashka ahiba maaha mid ku jirta odoroska miiisaaniyada. Khayraad la hubo ayaa loo aqoonsan lahaa in ay qayb ka yihiin sanduuqa lacageed, waxaana lagu hayn kari lahaa xisaabta guud ee dawlada ama xisaab dawladeed gaar ah oo ka mid ah baanka dhexe.

Isku-dubaridka sanduuqa la moodka lacageed (Virtual fund) ma carqaladayso maamulka maaliyada iyo hantida, waxaanay ka hortagtaa is-dhexgalka sanduuqa lacageed ee miisaaniyada. Waxa ay xoojin kartaa suurtagalnimada siyaasadeed, waxayna caawisaa dhitaynta dakhliga khayraadka, waxa kale oo ay caawinaysaa ka hirgalinta qawaaniin dhaqaale oo caafimaad qaba nidaamka miisaaniyada dhexdiisa, iyada oo xooga la saarayo hadhaaga lacageed ee koowaad ee aan khayraadka ka iman iyo iyada oo la muujinayo in dakhliga khayraadku ay ka duwan yihiin dakhliyada kale.

Sanduuqyo lacageed oo faro badan baa loo aasaasay in ay ahaadaan hay'ado dawladeed oo gaar ah. Lacago badan oo ka yimid khayraadka ayaa ah lacago ka baxsan miisaaniyada oo leh maamulkooda u gaarka ah, nidaam-hawleedkooda sooca ah, iyo xisaabaad. Marxalad kasta oo lacagayowga ay maamulaan hayado gaar ahi, qawaaniinta nidaam hawl-qabashada wanaagsan waxa ka mid ah kuwan soo socda:

- Hawl-galada shaqo ee lacagta waa in ay si buuxda qayb uga noqdaan nidaamka qormaynta siyaasada maaliyadeed, si loo ilaaliyo daganaanshaha dhaqaalaha xajmiga wayn leh ee guud.

- Xisaabaad faah-faahsan iyo xog kale oo ku saabsan hawl-galada shaqo ee lacagta waa in lagu daraa dhukumen garaynta miisaaniyada si loo dhiirigaliyo hufnaan maaliyadeed, waajibnimada in la kala saaro dakhliga lacageed, kharashka, xisaabinta iyo war-bixin celinta waa in ay ahaataa mid ku sugan nidaamyada miisaaniyada.

- Odoroska lacagta waa in loo soo bandhigaa sharci-dajinta iyada oo qayb ka ah nidaamka diyaarinta miisaaniyada.

Lacagta taas oo si maxali ah loo kharash gareeyo ama loo maal-galiyo ujeedooyin siyaasad dawladeed waxa laga yaabaa in laga sooco lacagta taas lagu maal-galiyo hantida dhaqaale ee maxaliga ah sababo la xidhiidha maamulka hantida iyo ganacsiga ah. Arintani waxa ay qusaysaa, si gaar ah, madax-bannaanida maamulka lacagta iyo heerka isku-dhafnaanta miisaaniyada.

Lacagayowga khayraadka kuwaas oo loo kharash gareeyo ama loo maalgaliyo si maxali ah si loo fuliyo siyaasado dawladeed waa in si dhaw looga mid dhigaa miisaaniyada. Lacagayowga leh ujeedooyin siyaasad dawladeed waxa ay masuul ka yihiin qabashada hawlaha aan ganacsi ahayn kuwaas oo lagu hirgalin karo cashuurta miisaaniyada iyo siyaasadaha kharashka. Tusaale ahaan, maal-gashiga dawladeed ee ay fulisay lacagi, ee ku jira nidaam kale oo biil noqon kara, waxa uu ku jiri karaa miisaaniyada. Lacagayowgani waa in ay u shaqeeyaan nidaam caawin kara qoondaynta khayraadka, guud ahaan siyaasada maaliyadeed iyo maamulka hantida. Iyada oo ay jirto abuurta maaliyadeed-la-moodka hawl-galada shaqo ee lacagayowgan, haddana in ay si dhaw ugu dhafnaato nidaamka miisaaniyada waa mid loo baahan yahay si looga hortago filiqsanaanta kharashka, loona dhawro maamul maaliyadeed midaysan. Iyada oo lagu darayo qodobada sare waa in arimahan la hawl galiyo, ugu yaraan kuwan soo socda:

- Qormaynta miisaaniyada, Saab-hawleedyada Kharashka ee Muddada Dhexe (MTEFS), iyo war-bixin maaliyadeedka waa in ay diirada saaraan bandhig dhammaystiran oo dhinacyo badan taabanaya (oo ay ka mid yihiin hawl-galada shaqo ee lacagta), si looga bixiyo sawir sax ah oo dhammaystiran oo dhaqaalaha dawlada ah marka laga hadlayo qormaynta siyaasad maaliyadeed iyo qiimayn.

- Dhammaan kharashyada lacagta waa in ay fulisaa khasnada dawladu (Si looga hortago in nidaamka wax-soo iibintu uu dhawr jeer oo isku mid ah dhaco).

***Lacagaha khayraadka ee loo maamulay si sharci iyo saldhig ganacsi oo cad waxa laga yaabaa in ay bixiso xoriyad intii hore ka badan iyada oo taasina isla badali karta war- bixin celin adag iyo waajibaadyada daba-galka xisaabeed*.** Maamulada lacageed ee maal-galiya qayb ka mid ah hantida dhaqaalee si maxali ah sababo ganacsi oo sooc ah ujeedooyin ah balaadhsi maamul iyo qiime hantiyeed waxa uu ficil galinayaa madax-bannaanida go'aano maal-gashi, oo xor ka ah faro-galin siyaasadeed, isaga oo cuskanayaa masuuliyada ay siisay dawladu. Marka ay xaaladan oo kale jirto, kaliya maal-gashiga wada jira ee dhaqaale ee maxaliga ah guud ahaan waa in la is waafajiyaa miisaaniyada (Ujeedooyin ah maamulka dhaqaalaha xajmiga wayn leh ee guud darteed). Bandhiga balaadhan oo wax badan koobaya ee miisaaniyada iyo lacagta muu ahaadeen mid waajib ah. Lacagtu kaliya waxa ay u baahan lahayd war-bixinta natiijooyinka oo hufan oo madax-bannaan, oo ay weheliso war-bixinaha daba-galada xisaabeed ee gudaha laga sameeyo ama dadyow dibada ahi sameeyaan.

Kala-duwanaanta u dhaxaysa lacagaha khayraadka ee u jahaysan ganacsi iyo lacagaha kale waxa ay noqon kartaa mid fahankeedu adkaado. Ficil ahaan, in laga sooco hawl-galada lacadeed ee ku taxaluqa ujeedooyinka balaadhsiga qiimaha ganacsi iyo qiimaha hantida, lacagaha kuwaas oo fuliya hawlaha ku jihaysan siyaasada dawladeed waxa laga yaabaa in ay fududayn. Arin muhiim ahi waxa uu noqonayaa awooda loo leeyahay in la qiimeeyo ujeedada and abuurta hawl-galada lacagta. Waxa intaas dheer, noociyada hawl-galada iyo jihaynta lacagta waxa laga yaabaa in ay isla badasho wakhtiga marka duruufaha ama siyaasadu is badasho.

- Tusaale ahaan, qaar ka mid ah maal-gashiyada noqday kuwo macaash leh ayaa waxa laga yaabayey in bilowgiiba la fuliyo sababtoo ah ujeedooyinka siyaasada.

- Dhinaca kale, lacagaha bilowgiiba loogu talo galay in algu maamulo qawaaniinta balaadhinta qiimaha hantida iyo ganacsi waxa laga yabaa aakhirka in ay u keento cadaadis siyaasadeed maalgashiga dhaqaale ee la jiheeyey, kharashka dawlada ama amaahinta ujeedooyin aan ganacsi ahayn.

- Xisaabtanka isticmaalka kharaadku waxa laga yabaa in kor loo qaado ama la balaadhiyo iyada oo la hirgalinayo in dakhliga khayraadka la mariyo miisaaniyada, iyada oo ay jirto lacag loo qoondaynayo sanduuqyada lacageed iyada oo ah wareejinta lacagta miisaaniyadeed.

Dhammaan xaaladaha oo dhan, maamul-wanaag adag, hufnaan, nidaam hawl-maamulka daba-galka xisaabaadka iyo xisaabtanka ayaa muhiim u ah ilaalinta khayraadka dawlada ee ku jira sanduuqada lacageed. Kuwan ayaan hoos lagu faaqiday.

Waxa jira aqoonsi caalami ah oo sii kordhaya oo ah muhiimada ay leedahay is waafajinta wanaagsan ee ka dhex-dhacda sanduuqyada lacageed iyo miisaaniyada. Tusaale ahaan, Qawaaniinta Santiago ee Sanaaduuqda Hantida Madaxa-bannaan (*Sovereign Wealth Funds – SWTs)* ee ay aqbalsan yihiin Kooxda Hawl-galka Caalamiga ah (International Working Group) ee Sanaaduuqda Hantida Madaxa-bannaan (SWTS), waxa ay ku baaqayaan in hawlaha sanaaduuqda lacageed kuwaas oo saamayn maxali ah oo toos ah oo muhiim ah ku leh dhaqaalaha xajmiga wayn leh ee guud in ay tahay in si dhaw loogala shaqeeyo masuuliyiinta lacagta iyo maaliyada si loo hubiyo sugnaanta siyaasada guud ahaaneed.

Marar dhawr ah, dawladuhu waxa ay sameeyeen dadaalo sannadahan dhawayto si ay u horumariyaan sanduuqada lacageed. Dib-u-habayn la sameeyey ayaa isku dayday in ay sidii hore si ka wanaagsan u dhex-galis sanduuqyada lacageed nidaamyada miisaaniyada iyo saab-hawleedyada siyaasada maaliyada, si loo xoojiyo hufnaanta maaliyadeed. Tusaalayaasha waxa ka mid ah gobolka Albeerta, Wadanka Aljeeriya, Aserbajaan, Jili, Kasakhistan, Migsiko iyo Ruushka.

4. Maamulka Hantida iyo Daynta

Lacagta laga helo khayraadku waxa ay kaalin muhiim ah ku leedahay khayraadka maaliyadeed ee waaxda dawlada. Sidaas darteed, sanduuqa lacageed waxa uu qodob muhiim ah ka noqon karaa guud ahaan haykalka maamul ee dawladeed ee hantida iyo daynta (ALM).

Qorshaha Hawl-qabasho ee maamulka hantidu waaa in loo qeexaa sanduuqa. Arintan waxa ku jira, ugu yaraan, qodobadan soo socda:

- Hagaha maal-gashiga qorshe-hawl-qabasho ee mudda dheer. Kuwan waa in ay soo saartaa wasaarada maaliyadu, dadka loo baahiyaa, muhiimadooda darteedna, waa in loo bandhigaa sharci dajinta si loogu helo taageero siyaasi ah xulashooyinka maalgashiga taas oo muhiim u ah in dawladu si lacag cadaan ah bixin karto, dayn la'aanta dawlada iyo horumarka wadanka.

    - Wasaarada Maaliyadu waxa ay ka faa'iidaysan kartaa talooyinka dadyowga dibada ee ku aadan qaabka uu yeelanayo hagaha maalgashiga la xidhiidha hanta dhaqaalee ee ugu haboon iyo qoondaynta hantida ee farsamo ahaan ugu wanaagsan ee la calmaday iyada oo ay jirto ujeedooyin siyaasadeed oo kala duwan sida awooda bixinta lacag cadaan ah, khatarta loo dulqaadan karo iyo faa'iidooyinka la filanayo.

    - Hagaha maalgashigu waa in uu qeexaa isku jirka hantida la jantay ee tirada saamiga uu qof kastaa yeelanayo marka la eego nooca qalabka la adeegsanayo sida dakhliga aan isbad-badalayn iyo saamiyada shirkada ee aan lahayn dulsaar sugan, iyo sidoo kale isku jirka lacagta, qoondaynta goboleed ee hantida, mulkiyada saamiyada ugu badan ee shirkad lagu yeelan karo (Haddii ay meesha leeg taha) iyo muddada tirada saamiyada ee qof leeyahay ee leh dakhlig go'an.

- Isku-duwista maamul ee hawl-gal shaqo ee lala qabanayo hayad taas oo maamuli doonta hantida sanduuqa, haddiiba ay tahay mid heshiis lagula saxeexday cid ka baxsan wasaarada maaliyada iyo haddii kaleba, sida baanka dhexe, hayada maamulka hantida dawladu, ama machad dhaqaale oo shisheeye oo takhasus u leh. Dawladu waa in ay yeelataa qoondayn masuuliyadeed oo cad si loo hubiyo in kuwa maamula and kuwa kormeera hawl-galada shaqo ee sanduuqa lacageed ay yihiin kuwo lala xisaabtami karo.

- Nidaam maamul oo dib u eegis soo noq-noqta ku sameeyaa hawl-qabadka sanduuqa lacageed isaga oo ku cabiraya halkii laga soo dhaqaaqay.

- Daruurinimada war-bixin celinta iyo nidaam maamulka daba-galka xisaabeed ee sanduuqa.

Qorshaha-hawl-qabadka maamulka hantida lacagta khayraadka waa in ay waafaqsanaataa ujeedooyinka waaweyn ee sanduuqa iyo ujeedooyinka siyaasadeed ee intii hore ka balaadhan ee dawlada iyo qorshe-hawl-qabadka ee hantida/daynta. Qorshe-hawl-qabasho oo kastaa waa in uu xisaabta ku darsadaa xadiga dhaqaale ee midaysan ee dawlada. Isku jirka hantida lacageed taas oo laga yaabo macne ahaan in tahay ta ugu saraysa haddii sanduuqa lacageed hayo dhammaan hantida dhaqaale ee dawlada daruuri maaha in uu noqdo ta ugu saraysa haddii dawladu ay leedahay hanti dhaqaale oo fiican oo ka baxsan sanduuqa. Gaar ahaan mararka ay dawladu leedahay hanti dhaqaale oo aad u balaadhan, waa xogta faah-faahsan ee awooda bixinta lacag cadaan ah/khatarta/macaashka la filanayo ee gabi ahaanba hantida xadiga saamiyada ee qof ama urur leeyahay taas oo ay tahay in la beegsado, halkii laga beegsan lahaa xogta faah-faahsan ee mid ka mid ah qaybaha saamiga ee qof ama urur leeyahay. Sida la dareemi karo, the covariance ee xadiga maalgashiga lacageed oo ay weheliso hantida kale ee dawlada waa in maanka lagu hayaa.

Marka intaas la yidhi, sanduuqyada lacageed ee leh inta badan ujeedooyinka xasilinta ee cimrigoodu gaaban yahay kuwaas oo laga yaabo in ay tahay in ay lacag u wareejiyaan miisaaniyada mudda yar oo ogaysiis ah guddaheed ayaa laga yaabaa in ay maalgashadaan si xoogan oo intii hore ka badan hantida cimrigeedu gaaban yahay ee hore u lacagoobi karta. Waxa lagu qiyaasaa in sannadkii 2011 sanduuqyada lacageed ee xasilintu waxa ay ku hayeen cel-celis ahaan in ka badan boqolkiiba 90 hantidooda ah nidaamyada dakhligu sugan yahay. Sanduuqyada lacageed ee dhitada lacageed, ayaa dhinaca kale, si xoog leh loo maalgashaday qiime saami lacageed u dhiganta (boqolkiiba 56), taas oo ka turjumaysa ujeedooyin kala duwan, khatar lagu qiyaasay in ay intii hore ka sarayso, iyo macaash lafilanayo in uu intii hore ka sareeyo.

Sanduuqyada lacageed waa in ayna maalgashan meelaha dawlada daynta lagaga leeyahay ee dalka gudihiisa ama dibadiisa. Qorshaha-hawl qabashada ee noocan ahi waxa uu samaynayaa macne yar, waxaana laga yaabaa in uu carqalad galiyo hufnaanta. Sanduuqa lacageed waa in aan loo ogolaan in uu wax soo daynsado: hawl-galadan waan in ay si toos ah u maamusho wasaarada maaliyadu. Hantida sanduuqa waa in aan loo isticmaalin ay damaanad u noqoto wax daynsiga dawlada. Haddii sanduuqa lacageed loo ogolaado in uu soo saaro damaanad, waa ay arintan ansixisaa ugu yaraan wasaarada maaliyadu; tiro wadamo ah, soo saarista damaanad dawladeed waxa ay ku xidhan tahay in uu jiro xadi aan la dhaafi karin oo cad iyo/ama waxa ay uga baahan tahay ansixin sharici dajinta, iyada oo ay sababtu tahay in damaanado ay tahay khatar kharasheed taas oo culaysin karta miisaaniyada mustaqbalka. Damaanada la soo saaray waa in lagu cadeeyaa bayaanada dhaqaale ee la baahinayo, dhukumantiyada miisaaniyada iyo war-bixinaha maaliyadeed (sida bayaanada khatarta maaliyadeed).

Wadamada khayraadku ceegaago ee leh awood xadidan, waxa la tixgaliyaa khiyaarka ah in bilowgaba maamulka hantida sanduuqa dhaqaale lagu wareejiyo hanti maamulayaan shisheeye oo sumcad sare leh. Arintan waa in lagu kabaa qorshe-hawl-qabad ee muddada dheer taas oo si qunyar ah loo horumarinayo awooda dawlada dhexdeeda ama baanka dhexe. Shuruudaha xulashada iyo qawaaniinta wareejinta maamulka waa in si cad oo hufan loo qeexaa, sidoo kale waa in la qeexaa war-bixin celinta lagu waajib yeelayo maamulaha shisheeye. Shuruudaha muhiimka ah ee xulashada hanti maamule waxa ka mid ah karti, adkaanta qorshe-hawl-qabashada maalgashi ee la doortay, kharashka uu ku kacayo, and maamulka. Mararka qaarkood, baanka dhexe maamule ahaan waxa uu ku wareejiyaa maamulida hantida maamule shisheeye ah.

5. Maamul wanaaga, hufnaanta iyo xisaabtanka

Casharada laga qaato waayo-aragnimada iyo hawl-qabad wanaagu waxa ay soo jeedinayaan in maamul wanaaga sanduuq lacageed iyo hufnaan adag ay muhiim u tahay gaadhista ujeedooyin siyaasad maaliyadeed oo caafimaad qaba. Maamul wanaaga iyo hufnaantu waxa ay muhiim u yihiin:

- In taageero dadweyne loo helo sanduuqa lacageed iyo ujeedooyinkiisa: Bulshadu waxa ay u dhawdahay in ay taageerto isku-dubaridka loo samaynayo isku darka hantida wadan ee muhiimka filasho ahaan marka la bixiyo xog lagu kalsoon yahay oo ku saabsan maamulka iyo is badalka horumar ahaaneed ee hantidaasi iyo marka ay u adeegsan karto cadaadis maamulka wanaagsan ee

hantida. Hufnaan la'aantu waxa ay carqalad galin kartaa xalaalnimada sharci, waxa ayna sil-siladaynaysaa taageerada shacbigu u hayo sanduuqa lacageed.

- In laga hor tago maamul xumada, musuq-maasuqa iyo tacadiga, iyada oo ay jirto xadiga khayraad ee uu sanduuqa lacageed maamulay taas oo lagu guulaysan karo ama lagu guul-daraysan karo.

Xisaabtan adag ku yimaada kala sarayn, garbo siman iyo hufnaantu waxa uu kor u qaadaa kartida iyo wacnaanta sanduuqa lacageed:

- **Xisaabtan ku yimaada kala sarayn:** Maamulka sanduuqa lacageed waxa ay tahay in lagu sameeyo kormeed maamul kala sareeya, waxaaanu u jawaab celiyaa una diran yahay maamul dawladeed oo ka sareeya, kaas oo markiisa ay la xisaabtamaan maamul dawladeed oo ka sareeya oo la soo doortay. Arintani waxa ay ku taxaluqdaa awoodo masuuliyadeed oo cad-cad iyo war-bixin celin joogto ah.

- ***Xisaabtan ku yimaad garbo-siman:*** hawl-galada shaqo iyo wax-qabadka shaqo ee sanduuqa waxa kormeera hay'ado kale oo dawladeed (oo ay uu ku jiro xafiiska daba-galka xisaabeed ee dawlada), waxaanay u war-bixin celiyaan bulshada rayidka ah.

Against this background, and more specifically:
Ka dhan ah gogol dhigan, iyo si gaar ahaaneed:

- Saab-hawleedka sanduuqa khayraadka waa in uu abuuraa oo taageera sharci dajintu

- Waa in uu jiraa masuuliyado iyo xisaabtan cad oo u dhexeeya mulkiilaha (had iyo gooraale ah wasaarada maaliyada) iyo maamulaha sanduuqa lacageed.

    - Mulkiilaha sanduuqa lacageed waa in uu yeeshaa masuuliyada guud, sida lagu soo faaqiday xaga sare, waa in uu dajiyaa qorshaha hawl-qabad ee hagaha maalgashiga, waa in uu qiimeeyaa hawl-galada maamul.

    - Maamulaha sanduuqa lacageed waa in uu fuliyaa qorshaha-hawl qabad ee maalgashiga ee uu dajiyey mulkiiluhu, waa in uu ku maareeyaa khatarta cabiro la isla ogol yahay dhexdooda, waa in uu suurtogaliyaa nidaam xisaabeed haboon, waa in uu u war-bixin celin karo sida ay dhigayaan shuruucdu.

- Daah-furnaantu waa xasaasi. Waxa ay ku taxaluqdaa bandhiga dawladeed ee ujeedooyinka sanduuqa lacageed, shuruucda, qorshe-hawleedyada maalgashiga iyo haykalka xisaabtanka iyo sidoo kale war-bixino dadweyne ee wakhtiyeysan ee muddadiiba mar ah ee ku saabsan hawl-qabadka sanduuqa lacageed iyo bandhiga hantida sanduuqa lacageed.

- Nidaamka maamulka iyo qiimayntu waa in ay ku jirto kormeel heer baarlamaan ah, qiimayn hawl-qabad, iyo daba-gal xisaabeed madax-bannaan oo gudaha dawlada ka yimaad ama ka baxsan.

6. Talooyin ku socda nidaamka sanduuqa khayraad iyo taageerada nidaamyada maamul maaliyadeed ee dawlada

Macquuliyada sanduuqa khayraadka waa in si taxadar leh loo tixgaliyaa iyada oo xaalad – xaalad lagu salaynayo. Waa maxay waxa caawimada sanduuqa lacageed uu kagaga wanaagsanaanayo miisaaniyad jirta iyo nidaamyo maamul hantiyeed? Miyaa faa'iidooyinka suurtagalka ahi ka miisaan culus tahay kharashaadka suurtoobi kara?

Sanduuqyada leh shuruuc hawl-gal oo aan adag waxa wanaagsan in laga hortago. Halka faa'iidooyinka sanduuqyadan ee xasilinta kharashka ama kobcinta dhigaalku ay ka tahay mid aan la hubin waayo lacagtu waa mid u jeedooyin kale loo adeegsan karo, iyagu ma aha kuwo caawinaya maamul maaliyadeed wax ku ool ah, waxaana had iyo goor keentaa kharashyo.

Sanduuqyada dhaqaalaha bixiya ee leh shuruuc dabacsan waa in la doorbidaa. Sanduuqyadan

lacageed kuma san-duleeyaan karti-daro iyo ad-adkaan siyaasada maaliyada. Waxa ay hoos u daadajiyaan isha ku haynta nidaamka siyaasada maaliyada iyo fulinta miisaaniyada. Sidoo kale waxa ay caawin karaan muujinta muhiimada NRB ee jihaynta mashruuc ahaaneed ee maaliyada. Is-waafaqsanaanta wanaagsan ee nidaamyada miisaaniyada iyo saab-hawleedyada siyaasada maaliyada waxa ugu wanaagsan ee lagu gaadhi lahaa iyada oo sugo in sanduuqa lacageed u hawl-galo sidiiyoo uu yahay xisaab dawladeed halka uu ka noqon lahaa hay'ad gaar ah, taas oo aan faro-galin nidaamyada maamulka maaliyada dawladeed, suurtagalisana maamul hanti iyo dayneed oo cad. Bandhiga cad ee wax-badan koobsanaya ee miisaaniyada iyo sanduuqa lacageedba waa in lagu daraa dhukumantiyada miisaaniyada.

Wadamada khayraadku ceegaago, habka koowaad ee ugu wanaagsan maaha in la siiyo sanduuqa lacageed awooda kharash bixinta iyo dib la mariyo daacadnimada miisaaniyada. Talo-bixintan oo ka imanaysa qawaaniinta maamulka maaliyada dawlada oo caafimaad qaba, tixgalinta abuurta dakhliga khayraadka, arimaha siyaasada dhaqaale, iyo cadaynta ka soo baxaysa waayo-aragnimada dalka. IImaha maamulka maaliyada dawlada ee jira waa in lagu xaliyaa xili horeba, halkii la isku dayi lahaa in isha laga laliyo iyaga iyada oo la kharash garaynayo lacag.

Sanduuqyada hay'adeed eel eh awooda in ay kharash ku bixiyaan ujeedooyinka siyaasada dawlada waa in si dhaw la isku waafajiyaa nidaamka miisaaniyada. Sanduuqyadan lacageed, wada-shaqayn dhaw oo lala yeesho miisaaniyada waa muhiim si loo hubiyo kala hormarinta kharash oo dhammaystiran, laga hortago kala qoqobnaan siyaasadeed, iyo in la dhawro maamul maaliyadeed midaysan. Sanduuqa lacageed waa in uu qayb ka noqdaa miisaaniyada balaadhan oo wax badan koobsanaysa oo loo gudbiyo sharci dajinta, hawl-galadeeda iyo qorshayaasheeda waa in lagu faaqido dhukumantiyada miisaaniyada. Arintan waxa loogu baahan yahay tixgalin aqoonaysan oo ah guud ahaan marxalada maaliyadeed.

Sanduuqyada leh awooda ah in ay maalgashi ku sameeyaan maxali ahaan qawaaniinta ganacsi ee qaybta ka ah nidaamyada hawl-qabasho ee maamulka hantida waa in loo ogolaadaa in ay u fuliyaan masuuliyadooda si madax-bannaan, waxaana looga baahan yahay in ay si hufan uga war-bixiyaan hawl-galadooda. Maamulada Sanduuqa lacageed ee masuulka ka ah balaadhinta qiimaha hantida lacageed ee ay tahay in ay qaataan khatarta loo dulqaadan kar waa in ay ka madax-bannaanaadaan faro-galin siyaasadeed. Sidoo kale, waa in ay masuul ka noqdaan natiijooyinka ka soo baxa lacagta, taas oo ay tahay oo looga baahan yahay war-bixin celin adag. Hawl-galada sanduuqa lacageed waa in lagu war-bixiyaa dhukumentiyada miisaaniyada.

Qorshe hawl-qabadka maamulka hantida waa in si hufan loo qeexaa. Waa in uu ku jiraa hagaha qorshe hawl-qabad ahaaneed ee maalgalinta iyo heshiiska maamul ee lagula jiro maamulaha hantida, dib-u-eegista nidaamyada hawl-qabad iyo war-bixin celinta iyo waajibnimada daba-galka xisaabeed.

Hawl-galada shaqo ee sanduuqa lacagta waa in laga war-bixiyaa oo daba-gal xisaabeed lagu sameeyaa. Hawl-galada shaqo ee sanduuqa iyo hantida dhaqaale iyo daymuhu waa in war-bixin joogta ah laga siiyaa dawlada, la soo bandhigaa bayaanada dhaqaale ee dawlada iyo sanduuqa, ee ay tahay in ay fuliyaan daba-gal xisaabeed oo ka yimaad gudaha dawlada iyo dibadeedaba.

Nidaamyo hawl-qabad oo adag si loo suurtogaliyo hufnaan, maamul wanaag iyo xisaabtan waxa ay waajib muhiima u tahay sanduuqyada khayraadka. Nidaamyo hawl-fulineed oo adag waa in ay meesha yimaadaan si loo caawiyo in laga hortago is-daba-marinta khayraadka dawlada iyo in la bixiyo hubantida ah in hantida dawlada loo maamulo si haboon oo taxadar leh.

Copyright © 2015
Bangiga Caalamiga ah ee dib-u-dhiska iyo Horumarka/Bangiga Adduunka

1818 H Street, NW
Washington, DC 20433
Telephone: 202-473-1000
Internet: www.worldbank.org

Qoraallada Bangiga Adduunka waxa loo soo daabacaa sidii natiijooyinka Bangigu uu ka gaadhay hawlihiisa loola wadaagi lahaa bahda horumara sida ugu dhakhsaha badan. Hadaba qoraalka maqaalkan laguma soo diyaarin hab waafaqsan nidaamka saxda ah ee loo maro qoraalada sida rasmiga ah loo saxay/tafatiray. Ilaha la soo xigtay ee qoraalka waxa laga yaabaa in ay yihiin qoraallo aan rasmi ahayn oo aan si toos ah loo heli karaynin. Qoraalkan waxa soo saaray shaqaalaha ama la taliyayaasha Bangiga Caalamiga ah ee dib-u-dhiska iyo Horumarka/Bangiga Adduunka. Waxa ay heleen, sida ay u fasireen, iyo gunaanadka lagu xusay qoraalkani kama turjumayo fikirka Agaasimayaasha Fulinta ee Bangiga Aduunka aa dawlahada Bangigu uu matalo. Waxa ay gabi ahaanba yihiin fikirka qoraaga mana ah in sinaba loogu nisbeeyo Bangiga Adduunka, ama hay'adaha la xidhiidha, ama xubnaha gudida agaasinka fulinta ee dalalka ay matalaan.
Bangiga Adduunku ma damaanad qaadayo saxsanaanta xogta ku jirta qoraalkan mana qaadanayo masuuliyadda caqaaqib kasta oo kal dhalata isticmaalkiisa. Xuduudaha, midabyada, diimaha, ama xog kale oo lagu muujiyo khariirad kasta oo qoraalkan ku jirtaa ma sheegayso go'aanka Kooxda Bangiga Adduunka ee xaaladda sharcinimo ee dhul kasta ama ansixinta ogolaanshaha xuduudahaasi.

Xuquuqaha iyo Ogolaanshaha
Qoraalka maqaalkan ku jiraa wuu xafidan yahay. In min-guuriyo iyo/ama in qayb ka mid ah ama dhamaan qoraalkan la naqilo/raro iyada oo aan ogolaansh loo helin waxa ay noqon kartaa xadgudub sharciga arintaasi khusayso. Bangiga Caalamiga ah ee dib-u-dhiska iyo Horumarka/Bangiga Adduunku waxa uu dhiiri galiyaa baahinta shaqooyinka uu qabto waxana uu u siin doonaa ogolaansho in dib loo isticmaalo qaybo ka mid ah qoraalkan sida ugu dhakhsaha badan.

Waydiimaha xuquuqaha iyo rukhsadaha khuseeya, ee ay ka miy yihiin xuquuqaha qiima dhimista, waa in lagu aadiyaa Xafiiska cidda soo Daabacday ee, Bangiga Adduunka, 1818 H Street NW, Washington, DC 20433, USA; fax: 202-522-2422; e-mail: pubrights@worldbank.org.